

ARDADA SOOMAALIYEED EE INDONESIA OO DOORTAY GUDDOOMIYE CUSUB



Ardayda soomaaliyeed ee indonesia ayaa shir sanadeedka ay qabsadaan sanad waliba isugu yimid si ay u doortaan hogaan cusub.

Xubnaha Midowga ardadayda soomaaliyeed ee indonesia oo dood dheer ka yeeshay xiriirka ay la leeyihiin ardada kale ee ajaanibta iyo kuwa u dhashay dalkan Indonesia ee

wax ka kala barata jaamacadaha ay ardada Soomaaliyeed dhigtaan, xiriirka wanaagsan ee ay la leeyihiin maamulka jaamacadahaas, ayaa dulmar iyo qiimeyn ku sameeyay sida hawl kornimada leh ee uu guddoomiyihii hore uga shaqeeyay hawlahaas xambaarsanaa xiriir iyo waxwada qabsi lala yeesho maamulka iyo ardada jaamacadaha ay dhigtaan.

Iyadoo la tixraacayay Xeer Hoosaadka u degsan Midowga Ardada Soomaaliyeed ee Indonesia, kaas oo xeerinaya in arday hore Guddoomiye u soo noqday aanu isa soo rashixi Karin mar labaad. ayaa waxaa halkaas soo bandhigay hamigooda ah in ay xilkaas qabtaan ilaa 5 musharax oo u



tartamay doorashada Guddoomiyaha Ardada Soomaaliyeed ee Indonesia.

Ka dib doorasho loo qaaday cidii qaban lahayd xilkaas ayaa waxaa ku guuleystay inuu qabto xilka Guddoomiyaha Ardada Soomaaliyeed ee Indonesia mudada sandka ah ee na soo xigta Md. Cabdixafiid Maxamed

Sheekh oo helay cod aqlabiyad ah. Ardadii ka qeybgashay doorashadaas

ayaa kula dardaarmay guddoomiyaha cusub inuu halkeeda ka sii wado xiriirka Midowga Ardada Soomaaliyeed iyo Ururada ardada kale ee wax ka kala barata Jaamacadaha, waxayna xusuusiyeen in sanadka xiga qiimeyn iyo xisaabtan lagu sameyn doono waxqabadka ururka uu hogaamin doono, iyadoo isu rajeeyay dhamaan in ay guul ka gaaraan ujeedada ay u yimaadeen wadankan oo ah in ay kala laabtaan aqoon iyo xirfad ay dadkooda iyo dalkooda wax ugu qabtaan.

Guddoomiyaha cusub Md. C/xafiid ayaa doorashadiisii kadib khudbad uu jeediyay ku sheegay in uu ka shaqayn doono sidii ardayda soomaaliyeed ee wadankan waxkabarata ay isugu xirnaan lahaayeen sidoo kale uu sii kordhin doono xiriirka ururka uu la leeyahay ururada ardayda ajaanibta ee wadankan waxkabarata.



Wabillaahi Towfiiq

Ardayda_somaliyeed@hotmail.com

Bandung 6 Febraayo 2009

MIDOWGA ARDADA SOOMAALIYEED EE INDONESIA
Bandung, Indonesia